

VOTE
NOV. 5



TECHLEVY
RENEWAL 2024

Learning · Safety · Support

ISD191.ORG/REFERENDUM

TUSAALAHA CODBIXINTA

SU'AALAHA DOORASHADA DUGSIGA DEGMADA 1

[DIB U CUSBOONEYSIINTA RUQSADDA CASHUURAHA MASHRUUCA RAASAMAALKA SII DHACAYA EE TIGNOOLAJIYADA]

Guddiga iskuulka ee degmada Iskuulka Madaxa banaan ee Lambarkiisu yahay 191 (Burnsville-Eagan-Savage) waxay soo jeediyeen in la oggolaado canshuurta mashruuca raasumaalka ee 3.632% lagu dhufto awoodda canshuurta saafiga ah ee degmada dugsiga. Oggolaanshahan wuxuu cusbooneysiinayaa oggolaanshaha degmada dugsiga ee hadda jira kaas oo la qorsheeyay inuu dhacayo ka dib cashuurta la bixiyo sanadka 2025. Lacagta ka soo baxday oggolaanshaha canshuurta mashruuca raasumaalka ayaa bixin doonta lacagaha lagu iibsado, kuwa lagu rakibo, kuwa lagu beddelo, kuwa lagu taageero loona dayactiro barnaamijyada iyo qalabka, hagaajinta tikniyoolajiyadda, nidaamyada tikniyoolajiyadda, shabakadaha, kaabayaasha, xafiiska iyo tikniyoolajiyadda barashada, iyo bixinta kharashyada shaqaalaha la xiriira tikniyoolajiyadda iyo tababarka. Oggolaanshaha canshuurta mashruuca raasumaalka ee la soo jeediyay ayaa ku dhowaad \$ 4,696,767.62 u ururin doono canshuuraha la bixinayo 2026, sanadka ugu horreeya ee la qaadi doono, waxaana loo oggolaan doonaa toban sano. Qiyaasta wadarta kharashka mashaariicda la maalgelinayo muddadaas waa ku dhawaad \$46,967,676. Miyaa la ansixinayaa bixinta lacagta mashruuca raasumaalka ah ee ay soo jeediyeen guddiga dugsiga ee degmada dugsiga madaxa banaan ee lambarkiisu yahay 191? ADIGA OO "HAA" UGU CODEEYNAYO SU'AASHA CODBIXINTA, WAXAAD CODKAAGA KU BIXISAY IN DIB LOO CUSBOONEYSIIYO CODBIXINTA MASHAARIICDA RAASUMAALKA KAAS OO LOO QORSHEEYAY INUU WAKHTIGEEDU DHAMAANAYO.

HAA

MAYA

Haddii la ansixiyo, tani waxay dib u cusbooneysiin doontaa ilaa \$4.6 milyan maalgelinta tignoolajiyada ee dhacaysa ee dugsiyada degmada 191.

Sababtoo ah waa cusboonaysiinta cashuurta jirta, ma jiri doonto cashuur kordhin haddii la oggolaado.

Canshuurtaani waxay bixisa lacag lagu badalo qalabka iyo qalabka ardayda iyo shaqaalaha, iyo sidoo kale barnaamijyada sida Schoology oo u ogolaanaya ardayda inay isticmaalaan nuxurka fasalka.

Cashuurtan ayaa sidoo kale caawisa ilaalinta amniga iyo nidaamka amniga dugsiga si loo ilaaliyo macluumaadka ardayga, shaqaalaha iyo qoyska.

WAX BADAN KA BARO
CUSBOONAYSIIINTA
CASHUURTA



BOOQO MAREEGTA
isd191.org/referendum



IIMAYLKA
referendum@isd191.org



TALEEFOON WAC
952-707-2019